





Pertussis (Xiiq-dheer)

Xaashida xaqiiqada



Pertussis, ama xiiq-dheerta, waxaa sababa bakteeriya. Dadka da' kasta ha jiraan e way qaadi kara xiiq-dheerta.



Xiiq-dheerta waa la kala qaadaa, badanaa waxaa la iskugu gudbiyaa qufaca ama hindhisada. Qofku waa inuu neefsadaa dhibco ka yimid.

Astaamaha iyo Calaamadaha



San duuf leh



Qufac



Matag ama gariir qufac kadib



Daal daran

Calaamadaha ugu horreeya ee xiiq-dheertu waxay la mid yihiin hargabka caadiga ah waxaana ka mid ah diif, qandho yar ama qandho la'aan, iyo qufac fudud. Hal ama laba toddobaad oo jirro ah kadib, qufucu wuu isbedelaa oo badanaa waa lama filaan oo lama xakameyn karo iyadoo qufaca yahay mid is-dabo joog ah oo aan joogsi ama neefsi lahayn. Cod xiiq dheer leh marka la neefsanayo ka dib dhacdo qufac ah ayaa dhici karta.

Xiiq-dheerta waxa lagu daweyn karaa antibiyootik waxana ay aad waxtar u leedahay haddii wakhti hore la bilaabo. Qufucu wuxuu sii socon karaa toddobaadyo badan daawaynta kadib, gaar ahaan haddii daawaynta la bilaabo goor dambe ee jirada.

Kahortagga



Dhaq Gacmahaaga Had iyo Jeer



Ku Dabool Qufaca Xusulkaaga



Guriga Joog Markaad Xanuunsato



Qaado Tallaal (Tallaalka DTaP ee carruurta, Tallaalka Tdap dadka ee waaweyn)

Wixii xog dheeraad ah, Booqo:



1. www.maine.gov/dhhs/pertussis
2. www.cdc.gov/pertussis

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Maine CDC nambarka 1-800-821-5821.